


Qofna ma rabo bulaacaddoodu inay soo noqoto.

KA ILAALI SALIIDA WAX-KARINTA, XAYRTA, IYO DUFANKA INAY XANNIBAAN BEEBABKAAGA!



Miyaad Ogayd?

Biyaha kulul ee qasabada, khal, ama saabuun raacda qasabadu ma yareynayso xannibaada (xirmidda).

Caanaha xumaaday ayaa sii adkaynaya oo xanniba beebabka. Ku shub caanaha xumaaday ama nooc kasta oo caano ah baaldiga bacrinta (compost).


Haddii aad shakisan tahay, ka saar!

Saliida wax-karinta iyo xaydha ayaa qabsanaya beebabkaaga oo sababaya xannibaad. Baddelka isticmaalka biyo-qaadaha, raac tallaabooyinkan hoose si aad u qashin-qubtid si ammaan leh.




Tallaabada 1. Qabooji saliida ama xaydha

Intaadan qashin-qubin, ha qaboobaan saliida ama xaydhu.



Tallaabada 2. Ka saar ama ka masax xaydhka weelasha

Saliidaha iyo xaydhaha ayaa noqon doona adke ama dareere. Xadi kooban ayaa lagaga saari karaa ama lagaga masixi karaa warqad tuwaala ah oo lagu dari karaa qashinka.



Xadiga badan, ku shub saliida caaga la xidhi karo (sida kartoona caanaha ama caagad) oo ku rid qashinka.



Waad ku mahadsan tahay ilaalinta nadaafadda marin-biyoodyada!